

Xoog Sheegashada iyo Dhalinta Baahiyaha Gaarka ah qaba

Sida Loo Aqoonsado Xoog sheegashada

Xoog Sheegashada

- Waa nooc habdhaqanka xadgudubka ah oo loo rabo in waxyeelo la gaysto.
- Caadiyan way soo laalaabataa inta badan.
- Waxay noqon kartaa midkood toos iyo mid dadban.
- Xoog sheegtaha iyo dhibanaha ayaan lahayn awood isle'eg.

Noocyada Xoog Sheegashada

- **Jirka** (laadista, haraatinta, xagashada)
- **Hadalka** (hadallada cayda ah, magacyo ugu yeerida, hanjabaada)
- **Xiriirka** (ku goobasho, faafinta been abuurka, xanta, ka saarida ama faquuqida)
- **Oonlaynka** (waxyeelada lagu gaysto baraha bulshada, taleefannada gacanta iyo iimeellada)

Noocyada Dheeriga ah ee Xoog Sheegashada ee loo gaysto Shaqsiyaadka Baahiyaha Gaarka ah qaba

- **Xoog sheegashada sasabashada** (in wax lagaa dhaadhiciyo uuna ku maamulo qof kale)
- **Xoog sheegasho ku dhisan xujo** (saaxiibo xun)
- **Xoog sheegasho ku danaysi ah** (u adeegsiga caqabadaha qofka qayb kamid ah xoog sheegashada)

Waxaa jira sharci la yiraahdo Sharciiga Sharafta ee Ardayda oo Dhan (DASA) kaasoo ka taageeraaya dugsiyada abuurista bii'o ka caagan takoor iyo dhibaataayn.

Xoog sheegashada nooc kasta waa nooc kamid ah rabshada kaasoo ay tahay inaan la aqbalin. Waalidiinta iyo Macalimiinta oo wadajira waa inay xal u helaan xoog sheegashada iyo hormarinta xirfada bulshada ee Barnaamijka Waxbarashada Gaarka ah (IEP) ee ardayda.

Maxaad Ka Qaban Kartaa Xoog Sheegashada?

Waxa ay tahay in waalidiintu sameeyaan

- Noqo u doodaha cunugaaga adoo ka warqabaaya una raadinaaya caawimaad.
- Ku xirnoow Iskuduwaha DASA ee degmo dugsiyeedkaaga.
- Diirada saar cunugaaga.
- Taageer cunugaaga (ha eedayn cunugaaga ama inkirin dhibaataada).
- Ku boori cunugaaga inuu ka hadlo waxa dhacay.
- Si taxadar leh ula soco xaalada cunugaaga (badqabka, caafimaadka shucuurta iyo dedaalka dugsiga).

Waxa ay tahay in Macalimiintu sameeyaan

- Waa inay abuuraan goob soo dhawayn iyo badqab siisa dhammaan ardayda.
- Waa inay u adeegsadaan fursadaha fasalka si:
 - Ay u baraan noocyada xoog Sheegashada.
 - Ay kala hadlaan sida ay caawimaad ku helayaan.
 - Ku kordhiyaan wada hadalka wanaagsan.
 - Ay wax ka baraan naafada iyo awoodaha.
- Ay siiyaan waxbarasho ama cashar, iyo khyaraad qadarinaaya kala duwanaanta, ayna ku jiraan naafooyinka.
- Inay waxa ka beddelaan barnaamijyada xoog sheegashada si ay ugu soo daraan dhalinta baahiyaha gaarka ah qaba.
- Ay abuuraan xeerarka la dagaalanka xoog sheegashada ee dugsiga iyo fasalka

Ma ogtahay?

- In ka badan 3.2 milyan oo arday ah ayaa dhibane u ah xoog sheegashada sanad kasta.
- Xoog sheegashadu badanaa waa sababta carruurto ugu ganbiyaan dugsiga ama uga baxaan.
- Iskuduwaha DASA ayaa jooga degmo dugsiyeed kasta.
- Dhalinyarada loo xoog sheegto ayay u badan tahay inay niyad jabaan, keli noqdaan, iyo/ama walaacaan.

Dookhyada iyo xogta ay bixinayso
 -gse.buffalo.edu/albertcenter
 -dosomething.org
 -pacer.org



www.parentnetworkwny.org
 info@parentnetworkwny.org
 716.332.4170



Xog ku qoran dukumiintigaan waxaa lagu abuuray deeq ay bixisay Waaxda Waxbarashada ee Mareykanka #H325160003. Hase yeeshee, mawduucyadaan ayaan caadiyan ka turjumayn xeerka Waaxda Waxbarashada Maraykanka, waana inaad u qaadan taageero ay bixinayso Dawlada Federaalka ah. Madaxa Mashruuca Carmen Sanchez.